Waa maxay Rabshadaha ku Saleysan Jinsiga ?

Qalalaasada ku saleysan jinsiga (GBV) waxaa lagu qeexaa hanjabaad kasta oo waxyeello leh ama fal lagula jeedo shaqsi ama koox iyadoo lagu saleynayo sida dhabta ah ama ay u arkaan:

- Jinsiga noolaha;
- Cadeynta jinsiga;
- Qeexida jinsiga:
- Rabitaanka galmo; ama
- Kala duwanaanshaha caadooyinka bulshada ee la xidhiidha raganimada ama dheddigga.

GBV waxa ka mid noqon kara xadgudub jidheed, galmo, maskaxeed, dhaqaale, iyo shucuureed. Waxay salka ku haysaa sinnaan la'aanta jinsiga ee qaab dhismeedka, xakameynta qasabka ah, iyo dheelitir la'aanta awoodda.

Dembiilayaasha waxay noqon karaan saraakiisha dawlada ama ururo, shakhsiyeed ay ku jiraan xubnaha qoyska, hoggaamiyeyaasha diinta, kuwa kale oo laga yaabo inaad taqaan, ama aan la garaneyn . GBV waa sida dil aan sabab laheyn, jirdil, xadgudub galmo, iyo guur qasab ah ayaa sidoo kale loo isticmaali karaa xeelad dagaal ama xilliyada xasillooni darada bulshada.

Yuu Saameeya GBV?

Kuwa da' kasta, xaalad dhaqan-dhaqaale kasta, dhaqan, aqoonsiga lab iyo dhedig ama muujinta, aqoonsiga galmo ama rabitaanka, jinsiyadda, qowmiyadda, dhalashada, ama diinta waxay la kulmi karaan ama sameyn karaan GBV. Haweenka midabka leh (gaar ahaan Hindida Maraykanka/Dhalad Alaska/haweenka asaliga ah iyo dumarka Madowga ah), haweenka soo-galootiga ah (gaar ahaan kuwa aan laheyn xaalad sharci ah), haweenka saboolka ah, kuwa aan qaan-gaarin, shakhsiyaadka naafada ah, iyo dadka laga tirada badan yahay ee galmada (tusaale ahaan, shakhsiyaadka aqoonsiga galmoodkooda, habka ama dhaqamada ay ka duwan yihiin inta badan) inta badan waxay la kulmaan nuglaansho korodhay iyo caqabadaha helitaanka ilaha.

Caawinaad Qarsoodiga ah Ayaa Lagu Heli Karaa Luuqadaada

Haddii aad la kullanto xadgudub guriga ama qalalaaso, ama daba gal, ama qalalaaso shukaansi ah, la xidhiidh Khadka Qalalaasaha Qoyska ee Qaranka 800-799-7233, 800-787-3224 (TTY ee dadka dhegaha la' ama maqalka culus), ama khadka thehotline.org.

Haddii aad la kulantay xadgudub galmo, wac Khadka Tooska ah ee Xad-gudubka Galmada iyo Kufsiga, Xadgudubka iyo Xidhiidhka Qaran (RAINN) ee qadka Qaranka 800-656- 4673. Waxaad sidoo kale booqan kartaa websaadyada si aad macluumaad dheeraad ah u hesho hotline.rainn.org.

Haddii aad la kullantay ama aad halis ugu jirto inaad la kullanto guurka qasab ah, wac khadka Qaranka ee ka Ganacsiga Dadka 888-373-7888, ama la xidhiidh Xarunta Daahfurka Guurka Qasabka ah ee Tahirih 571-282-6187. Waxaad sidoo kale iimeyl u diri kartaa FMI@tahirih.org.

Haddii aad la kullantay, aad halis ugu jirto, ama aad taqaano qof khatar ugu jira Gudniinka Fircooniga ah, xadgudubka ilmaha, ama dayacan, wac 800-4-A-CHILD (800-422-4453). Waxaad sidoo kale iimeyl u diri kartaa Shabakadda Dhammaadka Gudniinka Fircooniga ah info@endfgmnetwork.org ama booqo weebsaaydhka si aad macluumaad dheeraad ah u hesho endfgmnetwork.org.

Macluumadka dooqa socdaalka loo heli karo dhibanaaasha GBV ama ka ganacsiga dadka waxaa laga heli karaa weebsaydhka www.uscis.gov/humanitarian. Macluumaad dheeri ah iyo agab loogu talagalay dhibanayaasha ka ganacsiga dadka ayaa laga heli karaa www.dhs.gov/blue-campaign.

Agab yadan waxay kaa caawin karaan inaad aqoonsato badbaadada, sharciga, dhaqaalaha, iyo fursadaha socdaalka ee laga yaabo inay diyaar kuu yahiin.

Homeland Security

Qalalaasada ku Saleysan Jinsiga (GBV)

U.S. DEPARTMENT OF HOMELAND SECURITY

COUNCIL ON COMBATING GENDER-BASED VIOLENCE

M-1783

Tusaalooyinka GBV

Tusaalooyinka qaarkood ee GBV waxaa ka mid ah, laakiin aan ku xaddidnayn: qalalaasaha qoyska, qalalasaha shukaansiga, gudniinka fircooniga ah ama jarista (FGM/C), daba-galka, guurka khasabka ah, iyo qalalaasaha galmada, oo ay ku jiraan xadgudubka galmada, weerarka, iyo dhibaateynta.

Qalalaasaha Qoyska

Habka dhaqanka ee xiriirka loo isticmaalo in lagu kasbado ama lagu ilaaliyo awoodda iyo xakameynta lammaanaha, waalidka, ama ilmaha. Qalalaasaha qoyska waxay ku lug yeelan karaan jir, galmo, shucuur, dhaqaale, la xidhiidha socdaalka ama xadgudub maskaxeed ama hanjabaad. Tusaale ahaan, dembiilaha:

- Waxay kuula dhaqmayaann sidii hantidooda ama shay galmo loo isticmaalo.
- Wuxuu muujiyaa Maseer xad dhaaf ah iyo lahaansho.
- Ka soocaa asxaabta ama qoyska.
- Wuxuu xaddidaa oo kormeeraa xiriirka aad la leedahay dunida dibadda.
- U diidida, yareynta, ama kugu eedeynaya qalalaasada adiga, isagoo isticmaalaya walaaca, “maalin xun,” khamri ama daroogooyinka, xaalad caafimaad, ama xaalado kale oo cudurdaar ah.
- Wuxuu xakameynaya dhammaan dhaqaalaha, wuxuuna isticmaalaya hanjabaad iyo caga-jugleyn si uu kaaga ilaaliyo inaad shaqeyso ama aado iskuul; wuxuu xakameynaya doorashooyinka shakhsi ahaaneed sida waxa aad xidhaneyso ama qeybaha kale ee muuqaalkaaga.
- Wuxuu kugu hanjabaya ama kugu cabsi gelinaya awoodaada inaad ku hesho sharciga socdaalka.
- Wuxuu xakameynaya gelitaanka dukumentiyada muhiimka ah oo ay ku jiraan dhaqaalaha, aqoonsiga, socdaalka ama waraaqaha kale ee muhiimka ah.

Gudniinka Fircooniga ah ama Goynta (FGM/C)

Dhammaan sancooyinka ku lug leh qeyb ahaan ama guud ahaan ka saarista xubinta taranka ee haweenka dibadda ah ama dhaawaca kale ee xubnaha taranka haweenka sababo aan caafimaad aheyn.

- Gudniinka Fircooniga waxa uu ku dhici karaa meel ka baxsan goob caafimaad oo leh qalab aan habbooneyn, oo aan la nadiifin oo aan la suuxin; si kastaba ha ahaatee, Gudniinka Fircooniga ah ayaa sidoo kale isa soo taraya meelaha uu ka dhacaya goobaha caafimaadka sida xarumaha caafimaadka oo ay si sharci darro ah u fuliyaan xirfadlayaasha caafimaadka.
- Gudniinka Fircooniga waxa la sameyn karaa in ka badan hal mar waxana la sameeyaa inta u dhaxeysa dhalashada iyo da’da 15.
- Gudniinka Fircooniga waxaa laga yaabaa in lagu sameeyo isu diyaarinta guurka bulshooyinka qaarkood.
- Gudniinka Fircooniga wuxuu si toos ah u saameyn karaa caafimaadka shucuureed iyo jireed isla markaaba iyo muddada dheer.

Ka baqasho

Dhaqan soo noqnoqda oo sababi kara qof macquul ah inuu u baqo naftiisa ama badbaadada kuwa kale ama uu la kulmo murugo shucuureed oo la dareemi karo. Dembiiluhu wuxuu noqon karaa qof kasta, oo ay ku jiraan lammaane hadda ah ama hore ama qof aan la garaneyn. Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto baqdin haddii dembiilaha uu:

- Ku daba-galka ama kor ka ilaalinta gurigaaga, iskuulka, shaqadaada, goobtaada cibaadada ama meelaha kale;
- Dhibaateynta asxaabtaada, qoyskaaga, ama qofka aad u shaqeyso macluumaad ku saabsan halka aad joogto;
- Ku soo waco ama ku soo diro cod, qoraal, ama fariimo qoraal ah oo aanad rabin; ama,
- La socodka ama kula soo xidhiidhida khadka intarneetka, tusaale ahaan, iyada oo loo marayo baraha bulshada.

Guurka Qasabka ah

Guurka oo mid ka mid ah ama labada dhinacba aysan oggolaan ama aysan oggolaan karin, oo ay ku jiraan hal ama dhowr arrimood oo xoog, khiyaano, ama jujuubid. Waxa kale oo ay noqon kartaa sabab iyo cawaaqib labadaba rabshadaha qoyska, rabshadaha shukaansiga/haasawaha, rabshadaha galmada, ama dabagal. Dembiilayaasha badanaa waa kuwa kuugu dhow oo ay ku jiraan qoyska ama xubnaha bulshada. Dadka da’ kasta leh waxay la kulmi karaan guurka qasabka ah. Waxaa laga yaabaa inaad la kulanto guurka qasabka ah haddii:

- Waxaad dareemeysaa inaadan haysan doorasho ku saabsan cidda ama goorta aad guursaneyso;
- Adiga, ama qof kuu dhow, sida xubin qoyskaaga ah ama qof kale oo aad jeceshahay, waxaad la kullantay ama lagugu hanjabay in laga tagayo, go’doomin, diidmo waxbarasho, dhibaato dhaqaale, luminta xoriyada dhaqdhaqaaqa, ama xadgudubka jireed ama shucuureed;
- Dukumeentigaaga safarka, aqoonsiga, qalabka isgaadhsiinta, ama lacagta/taageerada dhaqaale ayaa lagaa qaaday si laguugu qasbo inaad guursato ama ku sii jirto guur aanad raali ka aheyn; ama,
- Isgaadhsiintaada iyada oo loo marayo tignoolajiyada ama siyaabo kale si dhow ayaa loola socdaa si looga hortago inaad raadsato caawimo ama taageero.

Xadgudubka Galmo

Waxaa ka mid ah dhibaateynta galmo, xadgudubka galmo, weerar, galmood Qaraabadaa, kufsi ama falal kale oo galmo aanad raali ka ahayn. Waxa ay ugu horreyn saameyneysaa haweenka, gabdhaha, iyo dadka badelay jinsigooda ay ku dhashen iyo shakhsiyaadka Labeebka ah.

- Xadgudubka galmo wuxuu ka dhici karaa xaalado badan qaab cabsi gelin ama ciqaab ah, oo ay ku jiraan xilliga dagaalka, xeeladda xagjirnimada rabshadaha leh, ama qoyskaaga, iskuulka, ama goobta shaqada.
- Nidaamyada caqiidada iyo xeerarka bulshada ayaa kordhin kara u nuglaanshahaaga xadgudubka galmo. Tusaale ahaan, ku dhawaad kala badh dhammaan shakhsiyaadka beddela jinsigooda ama a ayaa lagu xadgudbay ama la weeraray intii ay noolaayeen.
- Dembiilayaasha waxaa laga yaabaa inay yihiin lammaanahaagii hadda ama hore, qaraabada sida walaalahaaga, ilma-adeerada, waalidka, abtiyaasha iyo adeeradada, ama awoowayaashada, dadka aad isku fasalka tihiin, saraakiisha dawladda ama dad shisheeye.